metro
regional
arts
council

BARNAAMIJKA MUSTAQBALKA FARSHAXANIISTAYAASHA (ARTISTS' FUTURES)

Waa barnaamij kamid ah Hidaha Hormarinta Tayada Dhaqanka
Waxaana sameeyay Ururka McKnight iyo Ford.

Barnaamijka Artists' Futures wuxuu khayraadka si toos ah u siiyaa farshaxaniistayaasha iyo shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada ee Afrika, Afro-Latinx, Afro-Caribbean, Latinx, Chicanx, Eeshiya/Pacific Islander, iyo SWANA (Koonfuur Galbeed Eeshiya West iyo Waqooyiga Afrika) ee deggan agagaarka magaalo madaxeedka 7-da degmo. (degmooyinka Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott, iyo Washington), iyo farshaxaniistayaasha dhaladka Ameerikaanka ah/Hindia Mareykanka/Native Alaska ee degan Minnesota iyo 11-ka qabiil ee qaran ee wadaaga juqraafiga isku mid ah.

Barnaamijka Artists' Futures wuxuu taageero maaliyadeed oo dhan $35,000 siiyaa farshaxamiistayaasha shaqsiyaadka ah oo ay wehliyaan dheeraad iyo ilo dheeraad ah. Barnaamijka Artists' Futures waa barnaamij caalami ah, oo lagu dhiso xirfadaha iyo shakada kooxda farshaxamiistayaasha ah ee ka shaqeeya arrimaha la xariira farshaxan kasta marxalad kasta oo kamid ah farshaxankooda. Gollaha Farshaxanka Gobolka Metropolitan (Metropolitan Regional Arts Council, MRAC) wuxuu xiisaynayaa inuu maalgaliyo farshaxaniistayaasha iyagoo siinaya taageerada u oggolaanaysa inay kobciyaan awooddooda ay ku qaadan karaan khataraha hal-abuurka, oo ayna ku dhisaab xirfado farsamo oo gacan ka gaysan kara helida shaqooyin farshaxan oo wara ahna kuwo guuleysta.

Farshaxamiistayaashu waxay qayb wayn ka qaataan dhaqanka Mareykanka, waxay gacan wayn ka qaataan dhisida bulsho aad u dhisan, waxayna isku xiraan dhammaan bulshooyinka dalka kunool oo dhan. Hadana sidaas oo jirta, kuwa kunool Minnesita, waxay sii wadaan inay la kulmaan farqi wayn oo kajira degmada. MRAC wuxuu doonayaan in barnaamijka Artists' Futures noqda barnaamij bixiya wax ka badan arrimaha la xariria dhaqaalaha uu saameyn ku yeesha xirfadaha farshaxamiistayaasha. Taas badelkeeda, in arrintaan ay kor u qaado nolashooda. Waxaan xiisaynaynaa inaan maalgelino farshaxamiistayaasha anagoo siinayna taageerada u oggolaanaysa inay kobciyaan awooddooda ay ku qaadan karaan khataraha hal-abuurka, oo ayna ku dhisaab xirfado farsamo oo gacan ka gaysan kara helida shaqooyin farshaxan oo waara ahna kuwo guuleysta.

Barnaamijka Artists' Futures waxaa loo abuuray waxaana abuuray kooxo farshaxan oo isku dhaf ah iyo hogaamiyaasha dhaqanka ee xubno katirsan farshaxamiistayaasha bulshada la doonaayo in barnaamijkaan uu u adeeggo. Koox ka kooban 11 la-taliye oo ay weheliyaan shaqaalaha MRAC oo ku hawlan arrimaha asalka ah ee farshaxamiistayaasha, waayo-aragnimada iyo dhaqamada kala duwan ee kooxo dhawr ah oo diiradda saaraya iyo shirar hal ka hal ah, oo ay ka qayb qaadanayaan ku dhawaad 100 qof. Jawaabaha la isla wadaagay inta lagu jiray kooxaha diirad saarista waxaa si toos ah loogu muujiyay naqshada barnaamijka Artists' Futures.

Fiiro Gaar ah: *Guud ahaan dukumiintigaan waxaan ku adeegsanay erayga "farshaxan" oo loola jeedo labadaba farshaxamiistayaasha iyo shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada.*

Ujeedooyinka barnaamijka Artists' Futures:

- Farshaxamiistayaasha la doortay waxay haystaan khayraadka ay u baahan yihiin si ay u qaataan khatarta, si ay qaab habboon hal abuur ugu soo bandhigaan inta barnaamijku socdo.
- Farshaxamiistayaasha la doortay waxay balaariyaan xiriirkooda oo ay kujiraan xiriirada iyo istaraatiijiyada ay ku heli karaan taageero muddo dheer.
- MRAC wuxuu bixin doonaa ilo badan oo iskugu jira, dhaaaale, helida goobta, qalabka, iyo dadka) kuwaas oo muhiim u ah in lagu badelo joogitaanka farshaxanka, ku-dhaqanka, iyo nolosha farshaxanka la doortay.

Faahfaahinta Barnaamijka

Xogta Kulanka Muuqaalka ah: Agoosto 19, 2022, 12:00duhurnimo
Waqtiga Lasoo gudbinaayo: Octoobar 3, 2022, 11:59barqanimo
Taariikhda Ogeysiiska: Febraayo 22, 2023
Taageerada Dhaqaalaha: $35,000 (lama xadidan)
Ilo dheeraad ah: $2,000 oo loogu talagalay hormarka caalamiga ah, oo lagu daray helitaanka xirfadlayaasha iskaashada ah/goobaha/ururada
Muddada Kooxda: Taageerada MRAC iyo helida iskaashatada laga bilaabo Febraayo 2023 - Febraayo 2025
Shuruudaha Ka qaybgalaha:

- Ka qaybgal kulan Zoom oo soconaaya 90daqiiqo iyo munaasab salaan si aad ula kulanto kooxda farshaxanka ee la doortay, shabakada iyo si aad u barato sida loo helo ilaha la heli karo. La-taliyaha dhaqaalaha/xirfadlaha canshuurta waxay nagula soo biiri doonaan qayb kamid ah kulankaan si ay oga hadlaan shuruudaha canshuurta ogana jawaabaan su'aalaha.
- Ka qaybgal lix (6) kulan oo ah saacadaha qadada lana xariira isku xidhka qorshaysan. Munaasabadahaan waxay diirada saarayaan balaarinta xiriirka farshaxamiistayaasha la doortay ayagoo xiriir la sameynaaya dadka kale ee wax sawira, farshaxamiistayaasha xirfadleyda ah iyo ururada farshaxanka. Kulamadaan waxaa la isku dubaridi doonaa iyadoo lala kaashanaayo farshaxamiistayaasha la doortay si ay sida ugu fiican u waafajiyaan jadwalada ogana soo baxaan baahiyaha kooxda.

Tirooyinka Farshaxamiistayaasha La Doortay: 10

U qalmida

- Farshaxamiistayaasha gaarka ah iyo shaqsiyaadka hormariya farshaxanka Afrika, Afro-Latinx, Afro-Caribbean, Latinx, Chicanx, Eeshiya/Pacific Islander, iyo dadka reer SWANA ee deggan agagaarka 7-da degmo ee magaalo madaxda, iyo farshaxamiistayaasha Dhaladka ah ee Maraykanka/Hindida Mareykanka/Native Alaskan ee deggan Minnesota iyo 11-ka qabiil ee qaran ee wadaaga juqraafi isku midka ah ayaa xaq u leh mustaqbalka farshaxamiistayaasha.
- Farshaxamiistayaashu waa inay ku nool yihiin deegaanka u qalmo muddo aan ka yareyn 1 sano kahor waqtiga kama danbeysta ah iyo inta lagu jiro guud ahaan muddada heshiiska oo dhan.

- Farshaxamiistayaashu waa inay leeyihiin dhaqan farshaxan. Arrintaas waxaa loola jeedaa waa in farshaxamiistayaashu sameynayaan shaqada farshaxanka inta lagu jiray 5 tii sano ee lasoo dhaafay, waana inay awoodaan inay keenaan saambal shaqo oo la abuuray inta u dhaxeysay 2017-2022.
- Farshaxamiistayaashu waa inay diyaar u yihiin inay kulanada kooxda oga qaybgalaan qaab (muuqaal ama toos ah) inta lagu jiro labada sano ee muddada kooxda. **Fiiro Gaar ah:** Haddii aad shaki ka qabto awoodaada ah inaad u hesho khibrad kooxeed, ama haddii aadan xiisaynayn inaad balaariso fanka bulshadaada, helida fursadaha lagu hormarinaayo xirfada, ama wadaagista aqoonta iyo agabka, waxaa laga yaabaa in barnaamijkaan uusan kugu habbooneyn.
- Farshaxamiistayaasha la doortay waa inay haystaan Lambarka Aqoonsiga Canshuurta ee Gaarka ah (ITIN (Individual Tax Identification Number, ITIN) ama Lambarka Amniga Bulshada (Social Security Number, SSN), maadaama lacagta abaalmarintu tahay lacag la canshuuri oo la doonaayo in lagu soo bandhigo foomka 1099. *(Dakhligaan la balaariyay wuxuu saameyn karaa qaar kamid ah gunnooyinka. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la shaqeyso la-taliyaha dhaqaalaha si loo go'aamiyo dookha lacag bixinta ee adiga kugu habboon.)*
- Farshaxamiistayaashu waa inay ugu yaraan yihiin 18 sano gaar ahaan taariikhda kama danbeysta ah ee ah (Oktoobar 3, 2022).
- Farshaxamiistayaasha hadda ka diiwaangashan barnaamijka shahaadada fanka ee dhaqanka si ay u sii wataan BFA ama shahaado la mid ah uma qalmaan.

Ma dooneysaa in laguu tixgeliyo barnaamijka?

Haddii aad tahay farshaxamiiste buuxiyay shuruudaha u qalmida ee kor ku qoran aadna dooneyso in laguu tixgelito aadna kamid noqoto kooxda Artists' Futures, fadlan warqad ama muuqaal aad isku faahfaahinayso noogu soo dir MRAC's Submittable platform (https://mrac.submittable.com/). Waxaan eegi doonaa codsiyada ay soo gudbiyaan farshaxamiistayaasha u qalma ama "Qareenka Farshaxamiistaha" (fiiri sharaxaaada hoose).

Codsiga Warqada/Muuqaal ah

Codsigaan waxaa loo adeegsan doonaa in lagu go'aamiyo u qalmida, waxna looga barto xiisaha farshaxamiistaha, iyo in sidoo kale lagu go'aamiyo kala duwanaanshaha kooxda farshaxamiistaha la doortay. Waxaan hiigsaneynaa inaan taageerno farshaxamiistayaasha heerarka kaladuwan ee xirfadleyda ah, dhaqanka ku saleysan farshaxanka, isirka/qowmiyada, iyo aqoonsiyada tirakoobka.

Noqo qof u dooda Farshaxanka

MRAC waxay fahansan tahay in shaqsiyaadku badanaa helaan fursad ay jeclaan lahaayeen inay dadka kula taliyaan waxaana ku dhiirigelinaa taageerada noocaan ah nidaamka soo gudbinta codsiga. Haddii aad jeclaan lahayd inaad soo gudbiso magaca farshaxamiistaha si tixgelin loogu sameeyo, ama, haddii aad tahay farshaxamiiste oo aad jeclaan lahayd in qof codsiga kuu gudbiyo asagoo adiga wakiil kaa ah, waxay kusoo gudbin karaan sida "U doodista Farshaxamiistaha". U doodayaasha farshaxanka uma baahna inay oggolaansho ka helayn farshaxamiistaha aad u doodeyso ama inaad ogeysiiso farshaxamiistaha. Farshaxamiistayaashu waxay haystaan fursad ah inay iska baxaan si aan loogu sameyn tixgelin

haddii aysan dooneyn inay ka qaybgalaan. **Fiiro Gaar ah:** U doodayaasha farshaxanka waxay abuuri karaan hal codsi halkii waqti ee la cayimayba.

Nidaamka Soo gudbinta Codsiga

Waxaad haysataa dookh ah inaad codsiga kusoo gudbiso mid kamid ah qaababkaan soo socda:

- Soo geli fayl dukumiinti ah
- Soo geli fayl muuqaal ah
- Soo geli fayl maqal ah
- Buuxi bokisyada banaan ee kuyaala foomkeena soo gudbinta codsiga

Dooro nooca aad kusoo gudbinayso codsiga ee adiga kugu habboon. Majiro faa'ido ama faa'ido daro gaar ah oo ay ku kaladuwan yihiin noocyda lagu soo gudbiyo codsiga, dadka la xulan doono waxaa lagu xulan doonaa qaab bakhyi nasiib ah.

Warqad/Muuqaal Gaaban (dheerarka qoraalka/muuqaalka waxaa lagu talinayaa inay noqdaan 1 - 3 baragaraaf/ 2-5 daqiiqo)

Hoos waxaa ku qoran su'aalaha la iska rabo ee ay tahay inuu ka jawaabo qof kasta oo soo gudbinaaya codsiga. Waxaan dooneynaa inaan wax ka barano shaqada farshaxankaaga iyo nidaamka hal abuurka:

1. Maxaad sameysaa? Waa maxay waxa uu farshaxankaagu ku saabsan yahay?
2. Sharax xiisaha ku duugan farshxankaaga.
3. Imisa sano ayaad sameyneysay farshaxanka iyo soo bandhigida shaqadaada?
4. Waa maxay mashruucyada hal abuurka leh ee aad hadda ka shaqeynayso?
5. Nala wadaag mashruucyo kasta oo aad dhawaan dhameysay?
6. Wax nooga sheeg mashruucyada soo socda ee aad sameyn doonto 2 da sano ee xiggta?
7. Maxay tahay sababta aad u dooneyso inaad oga qaybgasho barnaamijka Artists' Futures?
8. Majiraan waxyaabo kale oo aad dooneyso inaad nala wadaagto? (ikhtiyaari)

Goobaha dheeraadka ah ee la iska rabo

MRAC waxay u baahan doonaan inay aruuriyaan xogta hoose inta lagu jiro nidaamka soo gudbinta codsiga:

- Magaca koowaad iyo magaca saddexaad ee sharciga ah
- Magaca doorbidida
- Magac uyaalada Jinsiga
- Qofka buuxinaaya foomka: Dooro "Farshaxamiiste" ama "U doodaha Farshaxamiistaha"
    - Haddii aad tahay qof U doodaya farshaxamiiste, waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo ku saabsan Farshaxamiistaha aad u doodeyso.
- Ciwaanka iimaylka
- Lambarka taleefanka
- Ciwaanka saxda ah ee qofka soo gudbinaaya codsiga (shaqaalaha MRAC waxay qiimeyn ku sameeyaan farshaxamiistaha lagu soo jeediyay habka u doodista si loo helo macluumaadkaan loona xaqiijiyo u qalmitaanka iyo xiisaha.)

- Dooro dhammaan aqoonsiyada tirakoobyada ee khuseeya. Shaqaalaha MRAC waxay qiimeyn ku sameeyaan farshaxamiistaha lagu soo jeediyay habka u doodista si loo xaqiijiyo xogtiisa.)
- Liis garee dhammaan qaybaha farshaxanka ee farshaxanku ka shaqeeyo
- Dooro marxalada xirfada: farshaxamiistaha soo baxaaya, xirfadaha hore ee farshaxanka, farshaxanka xirfadaha dhexe, ama farshaxanka caalamiga ah. MRAC waxay aqoonsan tahay in qeexitaannadaan yihiin kuwo la taaban karo waxayna ka codsataa farshaxamiistayaashu inay is-qeexaan.
- Ku lifaaq ama soo geli saambalka shaqadaada farshaxanka ee asalka ah
- Waxyaabaha lasoo gelin karo ee ikhtiyaariga ah: Warqada taariikhda ama CV-ga (waxaa loo isticmaali doonaa in lagu go'aamiyo marxalada xirfada laakiin looma baahna)

Shuruudaha Saambalka Shaqada

Shuruudaha MRAC waxay dhigayaan in farshaxamiistayaashu soo gudbiyaan lifaaqyada ama inay soo geliyaan saambalada shaqadooda si aan u xaqiijinno in farshaxamiistayaashu ay sameeyaan farshaxan la xariira dhaqanka. Saambalada shaqada waa inay yihiin saambalada asalka ahaa ee la sameeyay inta u dhaxeysay 2017 - 2022. **Fiiro Gaar ah:** codsigaan waxaa loogu talagalay in lagu go'aamiyo u qalmida. Ma sameyn doono go'aano ku saabsan mudnaanta farshaxanka iyo tayada.

Haddii waxyaabaha aad ku dareyso shaqada saambalka ay yihiin arrimo ka dhashay iskaashiga, fadlan sharax doorkaada hal-abuurka iyo habka go'aan qaadashada.

Saambalada Shaqada ee la Oggol yahay:

Lifaaqyada webseedyada farshaxamiistayaasha
Lifaaqyada sawirada
Lifaaqyada shaqooyinka horey loo qoray
Lifaaqyada muuqaalka ama maqalka ah
Lifaaqyada wareysiyada iyo wargeysyada
Lifaaqyada shaqada la daabacay
Soo geli sawiro, muuqaal, maqal, iyo shaqooyinka horey loo qoray

Noocyada Saambalada Shaqada ee la Oggol yahay

Sawirada - jpg, jpeg, png, tif, heic
Qoraalka - doc, docx, pdf, rtf
Muuqaalka - avi, mov, qt, wmv, mp4
Maqalka - mp3, wav, aiff

Fiiro Gaar ah: Saambalka shaqadu wuxuu noqon karaa shaqo markaas socota.

Tixgelinada kale

Haddi aad kujirtay FY2022 ee ah tallaabada xigta ee ugu danbeysa oo aadna buuxisay shuruudaha u qalmitaanka ma ahan inaad buuxiso foomka soo gudbinta codsiga. Magacaaga si ootamaatiga ah ayaa loogu dari doonaa qaybta tixgelinta. Haddii aadan dooneyn in laguu sameeyo tixgelin waxaad heli doontaa fursad aad oga baxdo hawshaas.

Sida aan U Go’aamino

Farshaxamiistayaasha Afrika, Afro-Latinx, Afro-Caribbean, Latinx, Chicanx, Eeshiya/Pacific Islander, Ameerikaanka Dhaladka ah/Hindida Mareykanka/Native Alaskan, iyo SWANA waxay ahaayeen, walina ahaan doonaan kuwo aan helin ilo ku filan, qiimeyn ku habboon marka la eego tabarucaadkooda Minnesota. Barnaamijka Artists’ Futures MRAC wuxuu qiimeyn doonaa qaab cusub oo shaqo oo la xariira sida loo caawin lahaa farshaxamiistayaashaan. MRAC waxay aqoonsan tahay kala duwanaanshaha qaab dhismeedka maalgelinta waxayna fahansan tahay sidoo kale in habka go’aan qaadashada ee nidaamyadaan uu la mid yahay sida ilaalinta albaab. Waxaan hiigsaneynaa inaan arrintaan awooda saarno anagoo sahminayna hannaan meesha ka saaraya eexda iyo xukunada qiimaha iyo mudnaanta.

Guddi kamid ah akhristayaasha ayaa dib u eegi doona soo gudbin kasta si ay u eegaan dadka u qalma. Haddii ay soo baxaan su’aalo ama loo baahdo caddayn dheeraad ah, akhriste ayaa laga yaabaa inuu kula soo xiriiro.

Dhammaan soojeedinta buuxiya shuruudaha u qalmitaanka waxaa la gelin doonaa hal ama in ka badan oo ah kooxaha u qalma ee mudnaanta la siinaayo iyo sidoo kale ‘Kooxda Farshaxamiistayaasha Guud’ waxaana loo dooran doonaa si bakhtiyo nasiib ah. Kooxahaan waxay jawaab cad u yihiin kala duwanaanshaha bulshada farshaxanka ee uu barnaamijkaan u adeego. Waxaan rajeynaynaa in farshaxamiistayaashu dareemaan deganaan si ay noola wadaagaan una soo bandhigaan aqoonsigooda, khibradahooda iyo shaqsinimadooda. Waxaan u dabaaldegnaa aqoonta khibradaha si buuxdana waxaa nooga go’an inaan ixtiraamno adkeynta aqoonsiga la takooro. Farshaxamiistayaasha leh arrimaha la xariira aqoonsiga khibradaha/ waaya aragnimo is-dhexgalka ah ayaa lagu mateli doonaa koox kasta oo matalaysa, iyagoo la siinaayo in ka badan hal fursad oo ay doortaan.

Hal magac oo koox kasta ka socda ayaa loo dooran doonaa si bakhtiyo nasiib ah. Haddii ay dhacdo in hal magac oo isku mid ah laga doorto dhowr kooxaad waxaan sii wadi doonaa xulashada ilaa magac aanan horey u dooran laga soo saaraayo koox kasta. Hal magac ayaa laga soo bixin doonaa koox kasta oo kamid ah kooxaha mudnaanta lasiinaayo ee u qalma shan magacna waxaa laga soo saari doonaa Kooxda Farshaxanka Guud.

Kooxeynta

Ka qaybgalayaasha Kooxda Diirada - 1
Farshaxamiistayaasha ay haysato Xasilooni la’aanta Guriyeynta - 1
Farshaxamiistayaasha aan nin iyo naagba ahayn/aan u ekeyn jinsigooda/nimoon naaga ah- 1
Farshaxamiistayaasha Qaba baahiyaha Naafada/Farshaxamiistayaasha Naafada ah - 1
Farshaxamiistayaasha Soo kacaaya - 1
Farshaxamiistayaasha Kooxaha Guud - 5

Helitaanka

MRAC waxay isticmaalaysaa nidaamyada lagu soo gudbin karo codsiga si ay ugu adeegsato nidaamka soo gudbinta. Aalada lagu soo gudbin karo codsiga waa la xaqiijiyay si ay u buuxiso baahiyaha dadka indho la’aanta ah, aragga dhibaatooyinka ka qaba, dhego la’aanta iyo maqal la’aanta ah, naafada waxbarashada, qaba cilada kobaca garaadka, dhaqdhaqaaqa xaddidan, naafada la xariirta hadalka, dareenka sawirida, iyo kuwaan oo la isku daray. Soo gudbinta codsiga waxaa lagu saleeyaa Tilmaamaha Helitaanka Mawduuca Shabakada (2.0) waxaana

lagu buuxiyaa Helitaan Heerka AA si loo hubiyo in dadka isticmaalaya tiknoolajiyada caawinta ay si fudud u isticmaali karaan boggaga iyo foomamka Soo gudbinta.

Haddii aadan awoodin inaad isticmaasho Nidaamka lagu soo gudbinaayo Codsiga ama aad jeclaan lahayd inaad noogu soo dirto qaab kale ood kusoo gudbinayso, fadlan nala soo xariir ugu yaraan hal asbuuc kahor waqtiga kama danbeysta ah si aan kuu caawino.

MRAC waxay ka shaqeynaysaa inay hubiso in xogta qoran, tilmaamaha, iyo soojeedinada aqoon-is-weydaarsiga la abuuray iyadoo maanka lagu hayo mabaadi'da gelitaanka. Sidoo kale, waxaan ku faraxsanahay inaan bixino agabyada farta waawayn ee dadka indhaha cilada qaba, Daabacaadaha Wayn, ama qaabab kale oo leh ogeysiis hormarsan oo ku kala duwan qaabka, laga bilaabo hal usbuuc ilaa marka loo baahdo, laakiin xitaa haddii waqtiga ogaysiiska uu dhaafay, waxaa laga yaabaa inaan weli awoodno inaan aqbalno codsiga.

Nala soo xariir muddo hore sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah si aan u billoowno wada sheekeysi ku saabsan inaad hubiso inaad haysato in fursadaha loo siman yahay la tixgeliyo.

Helida Luuqad

Xogahaan waxaa lagu turjumay af Isbaanish, Soomaali, iyo Hmong iyo in la heli karo webseedka MRAC. Ayadoo la adeegsanaayo ogeysiis hormarsan, MRAC sidoo kale waxay la xariiraan turjumaan ay qandaraas iyo/ama heshiis kula jiraan si uu oga caawiyo nidaamka.

Farshaxamiistuhu wuxuu soo gudbin karaa warqadiisa/muuqaalkiisa/maqalkiisa oo fayl ah oo ku qoran luuqad kasta sidoo kale MRAC waxay la shaqeyn doontaa turjumaanada/dadka luuqada fasira marka ay u baahdaan.

Xogta Xiriirka

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan nidaamka soo gudbinta codsiga ee guud iyo caawimaada farsamada, fadlan nagala soo xariir lambarkaan mrac@mrac.org ama 651-645-0402.

Su'aalaha iyo caawimaada la xariira u qalmida iyo/ama diyaarinta soo gudbinta:

Fadlan la xarir Jovan Rebollar (jovan@mrac.org ama 651-523-6381).

Ama, booqo barnaamijka bogga Artists' Futures kadibna buuxi foomka codsiga kulanka si aad u qabsato ballan oo aad ula kulanto xubin kamid ah shaqaalaha ku caawin kara. Foomka caawimaada waxaa la heli doonaa laga bilaabo Agoosto 15, 2022.
Fadlan samee dadaalkaaga ugu badan si aad u akhrido tilmaamaha oo dhan kahor inta aadan su'aalo noosoo wicin.

Eray bixinta MRAC Artists' Futures

Farshaxamiiste - waa shaqsi hal abuur leh oo si joogto ah usoo saara ama u abuura shaqo cusub asagoo adeegsanaaya foomamka hal abuurka iyo/ama kuwa aan hal abuurka ahayn.

Kuwaan waxaa kujira, laakiin aan ku koobneyn shaqsiyaadka adeegsada muuqaalka, bandhigyada, muusikada, tiyaatarka, maqalka, fanka, iyo/ama qaabab farshaxanka. (Guud ahaan dukumiintigaan waxaan ku adeegsanay erayga “farshaxan” oo loola jeedo labadaba farshaxamiistayaasha iyo shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada)

Dabeecada Farshaxanka la xariira - Waa qayb kamid ah hal abuurka barashada, aqoonta iyo/ku takhasuska.

Dhaqanka Farshaxanka la xariira - Waa qaabka farshaxamiistuhu u wahajo hal abuurka iyo fikradeynta shaqada. Kuwaan waxaa kujira laakiin aan ku koobneyn nashaadaadka jirka ee la sameeyo, ka qaybqaadashada fikradaha, ku shaqeynta qalabyada, agabyada iyo adeegsashada xirfadaha hal abuurka.

Koox - Waxaan koox ku qeexnaa kooxdada dadka ah ee la xusho laguna xusho aqoontooda iyo waayo aragnimadooda inta lagu jiro muddada barnaamijka.

Shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada - Ujeedooyinka barnaamijka Artists’ Futures MRAC wuxuu doortay qeexitaanka Ururka McKnight‘s ee “Shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada” oo lamidb ah “hogaamiyayaasha hal-abuurka Minnesota ee dhaqamada aan isticmaalin ereyga farshaxan (sida Ameerikaanka Dhaladka ah iyo Hmong), iyo sidoo kale dadka dhaqankooda ku saleeya soo gudbinta iyo ilaalinta hab-nololeed la xariira dhaqanka.” (Guud ahaan dukumiintigaan waxaan ku adeegsanay erayga “farshaxan” oo loola jeedo labadaba farshaxamiistayaasha iyo shaqsiyaadka hormariya dhaqanka bulshada.)

Kooxeynta - Barnaamijka Artists’ Futures waxaa loo aasaasay waxaana aasaasay koox farshaxamiistayaal ah oo isku dhaf ah iyo hogaamiyaasha dhaqanka oo kamid ah xubnaha farshaxanka bulshada ee barnaamijkaan inuu u adeego loogu talagalay. Koox ka kooban 11 la-taliye oo ay weheliyaan shaqaalaha MRAC oo ku hawlan arrimaha asalka ah ee farshaxamiistayaasha, waayo-aragnimada iyo dhaqamada kala duwan ee kooxo dhawr ah oo diiradda saaraya iyo shirar hal ka hal ah, oo ay ka qayb qaadanayaan ku dhawaad 100 qof. Jawaabaha la isla wadaagay inta lagu jiray kooxaha diirad saarista waxaa si toos ah loogu muujiyay naqshada barnaamijka Artists’ Futures. Sida looga hadlay hawshaan ka qaybgalka, Kooxuhu waxay matalaan dadka loo aqoonsaday inay wajahayaan caqabado adag oo taariikhi ah si ay u helaan ilo iyo taageerooyin dhaqaale, iyagoo sidoo kale xushmeynaaya codadka lala wadaagay aqoontooda, caqabadaha, iyo waayo aragnimada qaybta ka ah waxbarashadeena iyo hormarka aan sameynayno.

Hormarka Xirfadaha - Waa sii wadida fursadaha waxbarashada ama tababarka ama adeegyada laga caawiya inaan kobcino xirfadaheena, aana noqo kuwo la socda dhaqamada ugu danbeeyay, hormarinta xirfada qofka.

Xadid la’aan - Eraygaan waxaa loola jeedaa in lagu qeexo lacagta loo adeegsan karo ujeedo kasta. Tusaale ahaan, Lacagta Abaalmarinta ah ee $35,000 ee Barnaamijka Artists’ Futures’ ma ahan in loo isticmaalo farshaxanka ama barnaamijyada kale ee la xariira. Waxaa loo isticmaali karaa wax kasta oo ka qaybgaluhu go’aansado (tusaale ahaan, kirada, adeegyada raashinka, socdaal, farshaxanka cilmi baarista, daryeelka caafimaadka, daryeelka caafimaadka, deynta, iwm.).